

Akhbaarta Leenka Midabka Dahabiga ee METRO

Jidka 94 ayaa dhawaan yeelan doona gaadiid dheereeya

Ka dib markii la furay Leenka Midabka Dahabiga sannadkii 2025, Mashruuca Kordhinta Leenka Midabka Dahabiga wuxuu bixin doonaa adeeg gaadiid basas oo u dhexeeya faras-magaalaha Minneapolis iyo bartamaha magaalada St. Paul, kaas oo noqon doona mid ka dhakhso badan, la isku halayn karo, isla markaana soo jiidasho badan. Fidintan waxay sidoo kale bixin doontaa adeeg safar oo aan rakaabku bas kale u beddelanayn, kaas oo ka imanaya faras-magaalada Minneapolis kuna socda magaalooyinka dhanka bari ee aagga metro, oo ay ka mid yihiin East St. Paul, Maplewood, Landfall, Oakdale, iyo Woodbury. Waxayna dadka u sahlayasaa inay si hufan ugu kala safaan qaar ka mid ah meelaha ugu muhiimsan ee gobolka.

Leenka Midabka Dahabiga ee cusub, oo la hagaajiyay, wuxuu dadka u sahlayaa inay si hufan ugu kala safaan qaar ka mid ah meelaha ugu muhiimsan ee gobolka, oo ay ka mid yihiin:




- Faras-magaalaha St. Paul iyo Minneapolis
- Inta badan garoomada iyo goobaha lagu qabto ciyaaraha xirfadeed ee Twin Cities (Allianz Field, CHS Field, Grand Casino Arena, Target Center, Target Field, iyo U.S. Bank Stadium)
- Xarunta Ordway ee Fanka Bandhigyada

Leenka Midabka Dahabiga ee la fidiyay wuxuu keeni doonaa boosteejooyin cusub oo la hagaajiyay oo ku yaalla I-94 iyo Snelling Avenue, halkaas oo rakaabku kaga sii gudbi karaan Leemanka METRO A iyo B. Leenku wuxuu inta badan mari doonaa garbaha waddada ee jidka weyn ee I-94 ee hadda jira. Minneapolis, Kordhinta Leenka Midabka Dahabiga wuxuu ku isticmaali doonaa boosteejooyin hadda jira gaadiidka basaska dheereeya ee ku yaalla waddooyinka 7aad iyo 8aad, wuxuuna rakaabka gaarsiin doonaa ilaa iyo boosteejada Royalston Avenue/Farmers Market ee ku taala Minneapolis, oo ka tirsan Kordhinta Leenka Midabka Cagaaran ee METRO.

Leenka Midabka Dahabiga ee la balaariyay wuxuu beddeli doonaa Jidka 94, wuxuuna bixin doonaa adeeg joogto ah oo maalinta oo dhan ah, labada jiho, oo ay ku jirto adeegga maalmaha dhammaadka toddobaadka.



METRO Gold Line (Bus Rapid Transit)	Current METRO lines	Planned METRO lines
METRO Gold Line Extension (Bus Rapid Transit)	Blue Line (Light Rail)	Bronze Line (Bus Rapid Transit)
Park & Ride Lot	Green Line (Light Rail)	G & H lines (Bus Rapid Transit)
	Orange Line (Bus Rapid Transit)	
	A, B, C, D, & E lines (Bus Rapid Transit)	





Maxay macaamiishu filan karaan?

Leenka Midabka Dahabiga ee la dhamaystiray wuxuu beddeli doonaa Jidka 94, wuxuuna bixin adeeg joogto ah oo maalinta oo dhan ah adeega basaska deegaanka ah, labada jiho, oo ay ku jirto adeegga maalmaha sabtida iyo axadda.

Adeeg marar badan la heli karo

Si ka duwan baska degdegga ah ee rakaabka qaada xilliyada mashquulka badan, Leenka Midabka Dahabiga oo dhammaystiran wuxuu bixin doonaa adeeg maalinta oo dhan ah oo shaqaynaya toddobada maalmood ee toddobaadka, iyadoo basaskuna ay si ka soo noqnoqosho badan sidii hore u shaqaynayaan. Macaamiishu uma baahnaan doonaan inay safarradooda horay u sii qorsheeyaan—kaliya lacagta bixi oo safarka bilow.

Gaadiid dheereeya

Astaamo sahlaya in safarku noqdo mid dhakhso badan:

- Ku bixi \$2 mashiinka lacag-bixinta ee ku yaalla madasha boosteejada ka hor intaadan fuulin baska, si basku uga dhaqaaqo boosteejada si dhakhso badan.
- Goobta boosteejada oo kor loo qaaday waxay kuu fududaynayaan inaad si sahlan uga fuusho baska uguna degto, adigoo lugaynaya ama kursiga curyaanka ku socda.
- Joogsiiyo kuwii hore ka yar marka loo eego jidadka aan BRT-ga ahayn, iyo leemanka basaska u gaar ah oo ka caawiya baska inuu si joogto ah u socdo.
- Basasku waxay “codsan karaan” nalalka taraafikada inay siiyaan iftiin cagaaran oo hore loo soo hormariyey ama loo dheereeyey.

Boosteejooyin leh adeegyo-dheeraad ah oo la hagaajiyay

Hoyga sugitaanku wuxuu bixin doonaa meel raaxo leh oo lagu sugo baska iyo adeegyo-dheeraad ah oo kala duwan: Calaamadaha NexTrip ee muujinaya waqtiga dhabta ah ee bixitaanka basaska, khariidado, kuleyl, nalal, meelaha baaskiillada la dhigto, iyo amni dheeraad ah oo leh kamarado iyo taleefannada xaaladaha degdegga ah.

Basas khaas ahaan loogu talagalay adeeggan

Basasku waxay yeelan doonaan muuqaal gaar ah oo si fudud loo garan karo, iyagoo leh marinada gudaha oo ka ballaaran kuwii hore, albaabbo dheeraad ah iyo kuraas la laabi karo si boos loogu baneeyo kuraasta curyaamiinta iyo gaariyada lagu qaado carruurta.

Qayb ka mid ah shabakadda METRO ee sii ballaaranaysa

- Leenka Midabka Dahabiga ma aha oo keliya bas taga faras-magaalada, wuxuu isku xiri doonaa aagga bariga metro iyo shabakadda METRO ee gobolka.
- Marka la dhammaystiro, shabakadda METRO waxay in ka badan 500,000 qof u suurtagelin doontaa inay gaadiidka dadweynaha u isticmaalaan safarrada ay shaqada ku tagayaan ama kaga soo noqonayaan.
- Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shabakadda METRO booqo: metrotransit.org/metro

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [barta metrotransit.org/gold-line/gold-line-extension](http://metrotransit.org/gold-line/gold-line-extension)



Xafiiska Mashruuca Leenka Midabka Dahabiga ah
763-358-0219 | goldline@metrotransit.org

CIDA LAGALA XIDHIIDHAYO MASHRUUCA: Alyssia Bell
Isuduwaha Wacyigelinta Bulshada
goldline@metrotransit.org

